

Dhammaan wax kasta ee ku saabsan Canshuur Dhaafka Lacagta Joogtada ah ee Caymiska Horumarsan

# Wax Badan oo Loogu Talagalay Lacagtaada



## WAA MAXAY CANSHUUR DHAAF?

Canshuur dhaafku wuxuu yareeyaa lacagta joogtada ah ee qorshahaaga caafimaadka. Lacagahaaga caymiska ee joogtada ah waa lacagta aad bil kasta ku bixiso caymiskaaga. Waxaad keliya heli kartaa canshuur dhaaf iyadoo loo marayo *Washington Healthplanfinder*.

## SIDEE AYUU U SHAQEYAA CANSHUUR DHAAFKA?

Qaddarka canshuur dhaafka aad helayso wuxuu ku xiran yahay dakhliga qosyakaaga. Sida uu dakhligaaga u hooseeyo, waa sida ay u badan tahay canshuur dhaafka aad xaq u yeellan karto. Canshuur dhaafka ayaa la xisaabiyaa marka aad isku qorto.



\$500

Lacagtaada joogtada ah ee caymiska ee bil kasta

—



\$200

Canshuur dhaafka ay bixiso hay'adda IRS

=



\$300

Waxa aad bixinayso

## MAXAA KALE AYAAN U BAAHANAHAY IN AAN OGGAAADO?

**Isbeddellada warbixinta.** Ka dhig midkii ugu dambeeyay macluumaadka qoyskaaga ee ku jira gudaha *Washington Healthplanfinder*. Tani ayaa waxay xaqiijinaysaa in aadan dib u bixin goor dambe canshuur dhaaf.

**Isticmaal 1095-A-kaaga.** Foomkan ayaa loo baahan yahay si aad u xareyso canshuurahaaga. Waxaad foomkan heli doontaa bisha Jannaayo.

**Canshuurahaaga ku xaree waqtigii loogu talagalay.** Isticmaal foomkaaga 1095-A iyo foomka IRS ee 8962 si aad u xareyso canshuurahaaga. Hay'adda IRS ayaa joogin doonta canshuur dhaafkaaga haddii aadan isticmaalin. Haddii aad xaas ama xaasle tahay, waa in aad si wadajir ah u soo wada xareysaan si aad u heshaan canshuur dhaaf.

## TAAGEERO HEL HADDII AAD U BAAHAN TAHAY

Xarunteenna Taageerada Macmiilka ayaa kaaga jawaabi karta su'aalaha waxayna kugu xiriirin kartaa khubbaro ku sugan degaankaaga.



Naga soo wac  
1-855-923-4633



Nagu soo booqo  
[wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org)



Soo-degso app-ka  
WAPlanfinder

[wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org)  
1-855-WAFINDER | 1-855-923-4633

 **washington healthplanfinder**  
click. compare. covered.